



Xafiiska Wasiirka

KHUBADDA WASIIRKA ARRIMAHA DIBEDDA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA AH

Xeerka Ergooyinka Diblomaasiyadeed ee Jamhuuriyadda Somaliland Xildhibaanada sharafta leh,

Waxaa sharaf weyn ii ah in aan maanta halkan hortiinna ka soo jeediyo khudbaddan ku saabsan mid ka mid ah guulaha istiraatiijiga ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah ay gaadhay intii u dhaxaysay bisha Jeenaweri iyo Juun 2025 — diyaarinta iyo horgeynta Xeerka Adeegga Dibedda ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Xeerkan waxa uu yahay tiirka ugu muhiimsan ee dhisaya wasaarad diplomaasiyadeed oo nidaamsan, sharciyeysan, oo leh hannaan cad oo hagaya matalaadda Jamhuuriyadda Somaliland ee caalamka. Waxa uu si rasmi ah u qeexayaa qaab-dhismeedka safaaradaha iyo qunsuliyadaha, waajibaadka diplomaasiyiinta, iyo ilaalinta danaha qaranka dibedda.

Mudane Guddoomiye, Xildhibaanada sharafta leh,

Ujeedooyinka xeerkan waxaa ka mid ah:

1. In la helo sharci hagaya howlaha safaaradaha, qunsuliyadaha, xafiisyada ganacsiga, iyo ergooyinka joogtada ah ee Somaliland.
2. In si cad loo qeexo habraaca magacaabista danjirayaasha, shuruudaha looga baahan yahay, iyo waajibaadka laga filayo.



Xafiiska Wasiirka

3. In la dejiyo nidaam wax ku ool ah oo lagu ilaaliyo danaha qaranka iyo xuquuqda muwaadiniinta ku sugan dibedda.
4. In lagu xoojiyo waafaqsanaanta siyaasadda arrimaha dibedda ee Somaliland iyo qawaaniinta caalamiga ah ee ay ka mid yihiin Vienna Conventions ee 1961 iyo 1963.

Xildhibaanada sharafta leh,

Geedi-socodka xeerkan wuxuu ka soo maray marxalado muhiim ah:

- Qoraalka rasmiga ah oo si qoto dheer loo diyaariyey, laguna falanqeeyay talooyinka khabaro sharci, diblomaasiyadeed, iyo siyaasadeed.
- Qaabeynta dhismaha safaaradaha iyo ergooyinka, iyadoo si cad loo qeexay doora Danjiraha Guud, ku-xigeennadiisa, Xoghayeyaasha, iyo ergooyinka joogtada ah.
- Qeexidda waajibaadka iyo shaqada ergooyinka oo ay ku jiraan ilaalinta danaha qaranka, horumarinta xidhiidhka laba geesoodka ah, iyo ololeynta aqoonsiga caalamiga ah.
- Dejinta nidaam magacaabis oo cad, shuruudaha aqooneed iyo khibradeed ee danjirayaasha, iyo ilaalinta akhlaaqda iyo anshaxa shaqaalaha.
- Nidaaminta xuquuqda shaqaalaha diblomaasiyadda, oo ay ka mid yihiin mushahar, guryo, gaadiid, iyo daryeel caafimaad.
- Dhisidda nidaam isla xisaabtan iyo tallaabo ciqaabeed oo ka dhan ah ku xadgudubka waajibaadka.

Mudane Guddoomiye, Xildhibaanada qaaliga ah,

Saameynta istiraatiijiga ah ee xeerkan waxa ka mid ah:



Xafiiska Wasiirka

- Kor u qaadidda matalaadda Somaliland ee caalamka iyadoo sharci cad lagu hagayo.
- Kobcinta sumcadda iyo kalsoonida beesha caalamka ee Somaliland.
- Tayeynta maamulka diblomaasiyadeed iyo abuurista jawi shaqo oo hufan oo lagu dhiirrigeliyo isla xisaabtanka.

Intii lagu jiray muddadii u dhexaysay Jeenawari iyo Juun 2025, Wasaaradda waxay dhamaystirtay diyaarinta xeerkan, Golaha Wasiirrada ayaa si rasmi ah u ansixiyay, waxaana loo gudbiyay Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud si loo sameeyo dib-u-eegis sharciyeed. Talaabada xigta waa in lagu horkeeno Golaha Wakiillada, iyadoo aan rajeynayno in aad mudanayaal tixgelin qaran ku ansixisaan.

Ugu dambayn,

Xeerkan ma aha oo keliya sharci; waa tiir ka mid ah dhismaha mustaqbalka diblomaasiyadda Somaliland. Waa aalad aan ku mideyn karno matalaadeenna dibadda, ku ilaalin karno danaha muwaadiniinteena, uguna diyaargarowno aqoonsiga buuxa ee caalamiga ah.

Waxaan idinka codsanayaa in aad si mug leh u taageertaan ansixintiisa, si aynu u dhisno adeeg diblomaasiyadeed oo waafaqsan heerarka ugu sarreeya ee caalamiga ah.

Waad mahadsan tihiin.